



WASAARADDA H. MAALIYADDA JSL OO GOLLAHA-WAKIILADA U GUDBISAY KU-TALO-GALKA ODOROSKA MIISAANIYADDA SANNADKA 2022-KA OO 17% KA BADAN MIISAANIYADII 2021-KA

Nuxurka Qudbaddii Uu Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda
Dr. Sacad Cali Shire Ka Jeediye Golaha Ee Guud-Marka
Miisaaniyadda 2022-ka

Wasaaradda H. Maaliyadda JSL Oo 150 Cashuur-Bixiye U Qabatay
Kulan Aqoon-Is-waydaarsi ah Oo Lagu Lafogurayey Nidaamka
Online-Ka Ah Ee Cashuur-bixinta Iyo Meel Marinta Awoodaha Sharci
Ee Ururinta Cashuuraha

Is-Barbar-Dhiga Tacriifadaha (Rates) Cashuuraha
Jamhuuriyadda Somaliland Iyo Kuwa Wadamada
Jarka

Kulan-Hawleed Lagu Gorfaynayo Go'aanadda
Cashuuraha, Meel-Marinta Awooddaha Sharci Ee Waaxaha
Dakhliga Iyo Sidii Ay Kaalintooda Uga Qaadan Lahaayeen
Hay'addaha Kale Ee Dawladdu

Danjire
Magazine

OCT - DEC 2021

Fariinta Hawlwadeenada Danjire

Danjire waa xog-side sedex-biloodla ah,kaas oo ay soo saarto Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL. Wuxaanu dadweynaha kula wadaagnaa wixii xog ah ee aanu muhiim u aragno, anagoo kusoo ururina wixii dhacdooyin ah ee la xidhiidha shaqada aanu u idmanahay.



Wixii talo iyo toosin ah ee aanu ku horumarin karo xogsidahan iyo guud
ahaanba shaqada Wasaaradda waxaad nagula wadaagi kartaan Email-ka Wasaaradda:
Info@slmof.org ama formka cabashada iyo taloooyinka ee
Website-ka W.H.Maaliyada www.Slmof.org.

Follow & Subscribe us



Contents

Wasaaradda H. Maaliyadda JSL Oo Gollaha-Wakiilada U Gudbisay Ku-Talo-Galka Odoroska Miisaaniyadda Sannadka 2022-Ka Oo 17% Ka Badan Miisaaniyadii 2021-ka.....	2
Nuxurka Qudbaddii Uu Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda Dr. Sacad Cali Shire Ka Jeediye Golaha Ee Guud-Marka Miisaaniyadda 2022-ka.....	7
Golaha Wasiiradda JSL Oo Kal-fadhigoodii 84-aad Ku Ansixiyey Ku-talo-galka Odoroska Miisaaniyadda Dawladda Ee Sanadka 2022 Oo 17% Ka Badan Miisaaniyadii Sanadkii Hore.....	14
Kulanka Wadatashiga Degmooyinka Uu Ka Socdo Mashruuca Wadaaga Ah Ee Maamuul Daadejinta Adeegyada Bulshada Ee JPLG Iyo Wasaaraddaha Qaybta Ka Ah Mashruuca.....	17
Wasaaradda H. Maaliyadda JSL Oo 150 Cashuur-Bixiye U Qabatay Kulan Aqoon-Iswaydaarsi ah Oo Lagu Lafo-gurayey Nidaamka Online-Ka Ah Ee Cashuur-bixinta Iyo Meel Marinta Awoodaha Sharci Ee Ururinta Cashuuraha.....	19
Kulan-Hawleed Aqoon Iswaydaarsi ah Oo Lagu Gorfaynayo Go'aanadda Cashuuraha, Meel-Marinta Awooddaha Sharci Ee Waaxaha Dakhliga Iyo Sidii Ay Kaalintooda Uga Qaadan Lahaayeen Hay'addaha Kale Ee Dawladdu.....	22
Wasiir-Xigeenka Wasaaradda H.Maaliyadda JSL Oo Xafiskeeda Ku Qaabishay safirka u qaabilsan Wadanka Sweden arimaha Somaliland iyo Somalia.....	25
Kulan-Hawleed Laba Cisho Ah Oo Ku Saabsan Barnaamijka Dib-U-Habaynta Maamulka Maaliyadda Dawladda Ayaa Loo Qabtay Isu-Duwayaasha Hay'addaha Dawladda Ee Gobolka Awdal.....	26
Wasaaradda H. Maaliyadda JSL Oo Abaal-Marino Gudoonsiisay 31 Cashuur-Bixiye Ee Ugu Wanaagsanaa 2021-ka	30
Barnaamijka Dib-u-habaynta Maamulka Maaliyadda Dawladda (PFM).....	31
Buuga Xogsidaha Cashuuraha.....	32
Muwadiin Wax ka Barro Noocyada Tacriifadaha.....	34

Wasaaradda H. Maaliyadda JSL Oo Gollaha-Wakiilada U Gudbisay Ku-Talo-Galka Odoroska Miisaaniyadda Sannadka 2022-Ka Oo 17% Ka Badan Miisaaniyadii 2021-ka

Hargeisa 25 December 2021 (WHM)- Wasaaradda Horumarinta Maaliyaddadu iyada oo gudanaysa waajibkeeda Dastuurka Qaranka, qdobkiisa 55 aad farqadiisa 1.aad. iyo xeerka Maamulka Maaliyaddada ee Xeer No. 75/2016 qdobkiisa 5 aad, waxa ay

27-kii bishan December 2021-ka u gudbisay golalaha wakiiladda Miisaaniyadda Dawladda ee Sannadka 2022 oo ah Miisaaniyaddii 31-aad ee qarankanku yeesho.



Miisaaniyadu waxay ka koobantahay laba buug; ka dawladda dhexe iyo ka dawladaha hoose iyo hay'adaha madaxabanaan. Buuga miisaaniyada dawladda dhexe guud ahaan wuxuu ka koobanyayah 5 qaybood:



Miisaaniyadda dawladda dhexe ee sannadka 2022 waxay dhantahay Slsh.2, 410 (Laba Tirillion, afar boqol iyo billion). Waxay miisaaniyadii 2021 dheertahay 11%. Marka lagu daro miisaaniyadda dawladda hoose oo dhan slsh5,29b, iyo miisaaniyada hay'adaha madax banana oo dhan slsh2,77b iyo mashaariicda aynu xogtooda hayno ee hay'aduhu maal-geliyaan oo dhan slsh2,32b, waxay miisaaniyadda 2022 wadarahaan tahay Slsh 3,447b taasoo miisaaniyaddi 2021 ka badan 17%.



Siyaasadda Miisaaniyadda

Miisaaniyadeena 2022 waxaa hogaaminaaya siyaasado iyo himilooyin ay ka mid yihiin:

1. Isu dheelitirka dakhliga iyo kharashka (Balanced Budget).
2. Xakamaynta sicir bararka
3. Ilaalinta qiiimaha shillinka
4. Xoojinta amniga
5. Qabashada biyaha roobka
6. Ku talo galka abaaraaha
7. Kor u qaadida adeegyada caafimaadka iyo wax barashada
8. Dhiiri gelinta wax soo saarka
9. Ilaalinta deegaanka
10. Xoojinta raadinta ictiraafka
11. Dhismaha Kaabyaasha
12. Qabashada doorashooyinka.







Nuxurka Qudbaddii Uu Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda Dr. Sacad Cali Shire Ka Jeediye Golaha Ee Guud-Marka Miisaaniyadda 2022-ka



“Miisaaniyadda Jamhuuriyadda Somaliland Sannadka 2022

Gudoomiyaha, shirgudoonka, xildhibaanada, martisharafta, mudanayaal iyo marwooyinba waxaan gidigiinba idinu Salaamayaa Islaamka Mudane gudoomiye, Mudanayaal

aniga oo ka wakiila Wasaaradda Horumarinta Maaliyaddada oo gudanaysa waajibka Dastuurka Qaranka qdobkiisa 55 aad farqadiisa 1.aad. iyo xeerka Maamulka Maaliyaddada ee Xeer No. 75/2016 qdobkiisa 5 aad, waxaa ii sharf ah in Maanta oo ay taariikhdu tahay 27-12-2021 u soo gudbiyo golalaha Miisaaniyadda Dawladda ee Sannadka 2022 oo ah Miisaaniyaddii 31 aad ee qarankanku yeesho.

Mudane Gudoomiye, mudanayaal

Miisaaniyadu waxay ka koobantahay laba buug;

ka dawladda dhexe iyo ka dawladaha hoose iyo hay'adaha madaxabanaan.

Buuga miisaaniyada dawladda dhexe guud ahaan wuxuu koobanyahay 5 qaybood:

Qaybta kowaad: Waxay ku saabsantahay xaaladda dhaqaale ee dalka iyo dunida ee hadda iyo sannadka soo socda 2022(1-23) ka jirta

Qaybta labaad: Waxay ka koobantahay siyaasadda, iyo miisaaniyada oo kooban (24-49)

Qaybta sadexaad: waa mashariicda miisaaniyada ku jirta (49-56)

Qaybta afraad: Waa dakhliga iyo kharshka miisaaniyadda oo faahfaahsan (57-83)

Qaybta shanaadna: Waxay ka koobantahay boga hay'ad waliba ku leedahay miisaaniyadda.

Miisaaniyada

Mudane guddoomiye

Miisaaniyadda dawladda dhexe ee sannadka 2022 waxay dhantahay Slsh.2,410b. Waxay miisaaniyadii 2021 dheertahay 11%. Marka lagu daro miisaaniyadda dawladda hoose oo dhan slsh529b, iyo miisaaniyada hay'adaha madax banana oo dhan slsh277b iyo mashaariicda aynu xogtooda hayno ee hay'aduhu maal geliyaan oo dhan slsh232b, waxay miisaaniyadda 2022 wadarahaan tahay Slsh 3,447b taasoo miisaaniyaddi 2021 ka badan 17%.

Miisaaniyadu waxay koobantahay dhakhli iyo kharash.

Dakhliga

Dakhliga miisaniyada dawladda dhexe ee sannadka 2022 waxaa la filaya in 78% ama slsh1,857b ka yimaadaan kastamyada. Afrta kastam ee ugu weyn ee dakhligu ka soo xerooodaa waa kastamka Berbera, kastamka Kalabaydh, kastamka Zeylac iyo madaarka Hargeisa. Halka 20% ama slsh488b laga filaayo in ay ka yimaadaan cashuuraha beriga. Afarta magaalo ee cashuuta berigu badi ka timaadaa waa Hargeisa, Berbera, Borama iyo Burco. 2%da soo hadhay waxay u badanyihiin ruqsado, liisamo iyo ganaaxyo soo mara hay'adaha dawladda ee kala duwan.

Dhinaca Kharash

Miisaaniyadda 2022, 53% ama slsh1,104b wuxuu ku baxayaa mushar iyo gunno; 24% ama slsh534b wuxuu ku baxayaa hawl socodsiin ama alaab iyo adeeg. Halka 15% ama slsh351b ku baxayaan mashaariic, dhismayaal iyo hantida raagta. 8% soo hadhay waa kharsho kale oo ay ka midyihin kaalmooyinka, daryeelka, lama filaanka iwm.

Odoroska iyo meeleynta miisaaniyada 2022 waxay ku fadhidaa 3 qodob oo kala ah:

1. Geedi socodka korodhka miisaaniyada ee soo jireenka ahaa (trend)
2. Xaladaha dhaqaale ee sannadkan, 2021, iyo odoroska xaalada dhaqaale ee sannadka 2022 iyo
3. Siyaasadda miisaaniyada oo ku xidhan qorshaha qaranka

Geedisocodkamiisaaniyadda

Miisaaniyadu sannad walba way korodhaa. Miisaaniyadda dawladda dhexe Sannadkii 2018 waxay korodhay 9%; 2019kii waxay korodhay 6%; 2020kii waxay korodhay 15%; 2021kii waxay korodhay 3%, sannadka 2022kana waxaanu kordhinay 11%.

Dhaqaalaha

Mudane guddoomiye

Sannadkii 2020 waxaa soo gaadhay dhaqaalaha Somaliland hantaaqooyin uu keenay safmarka Covid19. Taas oo keentay in qiyaastii 3% uu hoos u dhac ku yimaado dhaqaalaha. Waa arin aynu laqabnay caalamka inteeda kale. Wuxuu la qiyasay in dhaqaalaha dunida uu ku yimi hoos u dhac dhan 3.4%. Laakiin waxaynu filaynaa in sannadkan 2021 dhaqaaluhu soo kabto oo koro 3.3%. Sidoo kale waxaa la filayaa in dhaqaalaha dunidu koro 5.4%. Sannadka soo socda waxaynu filaynaa in korodhka dhaqaaluhu sii socdo oo uu koro 3.3%. Laakiin korodhkaasi wuxuu ku salaysanyahy furista xoolaha xajka iyo badbaado hantaaqoon dhaqaale iyo dabiici. Sagaalkii bilood ee sannadka 2021 ugu horeeyey Jan-Sep waxaynu dhoofinay xolo gaadhaaya 1.7m, halkii marka xajku furaa aynu ka dhoofin jirey 3-3.5m sannadkiiba

Siyaasadda

Mudanayaal

Miisaaniyadeena 2022 waxaa hogaminaaya siyaasado iyo himilooyin ay ka mid yihiin

1. Isu dheelitirka dakhliga iyo kharashka (Balanced Budget).
2. Xakamaynta sicir bararka
3. Ilaalinta qiimaha shillinka
4. Xoojinta amniga
5. Qabashada biyaha roobka
6. Ku talo galka abaaraha
7. Kor u qaadida adeegyada caafimaadka iyo wax barashada
8. Dhiiri gelinta wax soo saarka
9. Ilaalinta deegaanka
10. Xoojinta raadinta ictiraafka
11. Dhismaha Kaabyaasha
12. Qabashada doorashooyinka

Isu dheelitirka Miisaaniyada

Haddaan ku bilaabo miisaaniyadda, Miisaaniyadeena lama kabo, deyna uma qaadano si aynu daboolo ku talo gal is dhin. Himiladeenu waxa weeye dakhligeena iyo kharashkeenu isku sargo'naadaan. Haddii kharashkeenu dakhligeena ka bato wuxuu keenayaa sicir barar iyo qiimaha shillinka oo hoos u dhaca.

Sicir barar

Afartii sannadood ee u dambeeyey waxaynu ku guulaysanay in aynu xakamayno sicir bararka oo kasoo dejino 14% sannadkii 2018 oo keeno 3.5% sannadkan 2021. Sannadka 2022 hemiladeenu waxa weeye in aynu sicir koradhka ku hayno 4-5%. Laakiin saddexdii bilood ee u dambeeyey qiimaha raashinku wuxuu kacay 14%. Taana waxa keenay Covid19 oo sababay hoos u dhac ku yimi wax soo saarka dunida, gaadiidka badda oo yaraaday, lana waayey, sidaa aawadeed qaali garoobay iyo innaka oo waxyaaabaha daruuriga ee aynu ku noolahay debedda ka keena. Hadaba si aynu wax uga qabano culayska dadka kaga yimi maceeshada kacaday waxaanu ku talogalay in 10% laga dhimo cashuurta saddexda shay ee daruuriga ah: Bariiska, daqiiqda iyo sonkorta

Qiimaha Shillinka

Waxaynu sidoo kale ku guulaysanay in aynu ka ilaalino in qiimaha shillinkeenu hoos u dhaco. Saddexdii sannadood ee u dambeeyey wuxuu qiimaha shillinku ku fadhiyey 8,400 – 8,600 Dollarkiiba. Wuxuu naga go'an in aanu ku ilaalino sarifka sannadka 2022 8,000 – 8,600. lacagtana la gaadhsiiyo dalka oo dhan.

Amniga

Mudane gudoomiye

Haddaan amniga u gudbo, waxaa marwalba innoo mudan amniga. Sannadkan si gaara ayeynu ugu xusnay miisaaniyadda. Waxaynu mushaharka ciidanka kordhinay 20%. Isla markaa waxaynu xoojinay tiradiisa, tayadiisa, iyo saanadiisa. Guud ahaan waxaa hay'adaha amniga sannadkan loo qoondeeyey miisaaniyad dhan slsh.860b oo tii 2021 ka badan 13.4%

Biyaha

Amniga marka laga yimaado waxaynu sannadkan mudnaan gaara aynu siinay biyaha. Miisaaniyadda biyuhu waxay sannadka 2022 korodhay 94%. Wuxuu loo qoondeeyey slsh47b. Oo aanay ku jirin miisaaniyadda abaaraha loogu daray kaydka qaranka oo dhan slsh15b.

Adeegyada

Adeegyada caafimaadka iyo waxbarashadu waxay mar walba safka hore kaga jiraan waxyaabaha innoo mudan. Iyada oo taa la tixgelinaayo waxaa la kordhiyey miisaaniyadd hay'adaha ku suntan caafimaadka 32% waxaana la gaadhsiiyey slsh147b. Sidoo kale waxaa wasaarada wax barashada iyo guddida tacliinta sare miisaaniyadooda lagu daray slsh14b, waxaana la gaadhsiiyey slsh208b.

Wax soosaar

Guddoomiye iyo mudanayaal

Waxay miisaaniyadda 2022 dhiiri gelinaysaa wax soo saarka. Wadaagaha wax soo saarka oo ka kooban xoolaha, beeraha iyo kaluumaysiga, waxaa miisaaniyadooda la kor dhiyey 12.5%, waxaana la gaadhsiiyey 63b. Maadaama cilmi baadhisu aad muuhim ugu tahay wax soosaarka beeraha, waaa laga dhexsaaray wasaaradda oo guddi ama boodh madaxbanaan ayaa loo sameeyey.

Dhiiri gelinta wax soo saarku kuma eka miisaaniyada, ee waxaa cashuur dhaaf loo sameeyaa qalabka beeraha, qalabka kaluumaysiga, iyo qalabka, agabka iyo wixii ceedhin ee warsheduhu isticmaalaan oo dhan. Waxaanu sannadkan todobadii bilood ee ugu horeeye Jan-Jul samaynay cashuur dhaaf ka badan \$44m.

Deegaanka

Maadaama dhaqaalaheenu ku xidhanyahay deegaanka, waxaa miisaaniyada wadaagaha deegaanka la kordhiyey 19%, waxaana loo qoondeeyey qadar dhan slsh35b. Waxaa sannadkan wadaagaha ku cusub Wasaaradda horumarinta reer miyiga oo iyadu xidhiidhindoota hay'adaha kala duwan ee la shaqeeya reer miyiga. Wasaaradda deegaanka iyana waxaa la balaadhiyey xaydaamka shaqadeeda oo waxaa lagu daray is-bedelka cimilada.

Aqoonsi

Mudane guddoomiye

Markasta aqoonsigu wuxuu innoogu jiraa waxyaabaha innoo mudan. Hadaba si aynu ugu guulaysano hankeena aqoonsi, waxaa sannadkan miisaaniyadda wasaardda arimaha dibedda iyo iskaashiga caalamka lagu kordhiyey 20%, waxaana la gaadhsiiyey shsh58b.

Doorasho

Mudanayaal

Geedi socodka demoqraadiyada iyo doorashooyinku waxay ku jiraan waxyaabaha mar kastabaa innoo mudan. Sanadkan, 31st May waxaynu galay doorasho isku sidkan oo innagaga baxday ilaa \$21m. Lacagtaasi waxy ka timi ku talo gal aynu samaynay muddo afar sannadood ah 2018-2021. Taasbaa innoo suurto gelisey in aynu innaku 75% kharashkii ku baxay doorasha sannadkan 2021 bixino. Sannaka soo socda isna waxaynu samaynay ku taloay gal dhan slsh28b. Waxaanu ku rajo weynahay in deeqbixiye yaashu bixindoonaan 75% doorashooyinka 2022 innagu soo fool leh, innana aynu bixindoono 25% sidii caadadu ahaan jirtey.

Warbaahinta

Warbaahinta iyo wacyigelintu waa tiirkarka qarannimada iyo midnimada. Laakiin beryahan dambe hakad ayaa ku yimi idaacada qaranka ee hirarka gaagaaban. Sidaa aawadeed waxaa sannadkan loogu daray miisaaniyadda slsh11b. si aynu idaacad dalkoo dhan gaadha ugu soo iibsano.

Kaabayaasha

Kaabayaashu waa tiir dhexaadka horumarka, waxaanay innoogu jiraan waxyaabaha innoo mudan. Waxa markaa xusid mudan kaabayaasha miisaaniyada 2022 ku jira oo ay ka mid yihiin:

1. Dekeda Maydh
2. Wada Ceerigabo – Burco
3. Wadada Burco-Sheikh
4. Biyo balaadhinta Hargeisa
5. Biyo balaadhinta Borama
6. Birijka Gebiley
7. Mashaariicda kaabayaasha ee laga maal geliyo sanduuqa gobolada bariga oo ay ka mid ah:
 - a. Wadada tabca
 - b. Wadada Kalabaydh
 - c. Wadada Xargaga
 - d. Wadada Widhwidh

Kaalmooyinka iyo daryeelka

Mudanayaal

Sannad walba waxaa miisaaniyada lagu daraa qoondo loogu talo galay kaalmooyinka iyo daryeelka baahiyaha gaarka ah. Sannadkan waxaa miisaaniyada 2022ka ku jira qadar dhan 49b oo loogu talo galay in lagu kaalmeeyo laguna saryeelo iskuulo, cisbitaalo, ururo bulsho, bara kacayaal, naafo, agoomo iyo derbjiif.

Cashuuraha

Mudane guddoomiye

Iyada oo la tixgelinaayo duruufaha adag ee ka dhashay safmarka COVID19,

- waxba laguma darin cashuuraha beriga oo ay ka mid yihiiin cashuurta macaashal macaashka

(10%), cashuurta kirooyinka(6%), cashuurta mushahaarooyinka(6%), iyo cashuurta iibka(5%).

- Dhinaca cashuuraha kaṣtamka,

- o cuntada lagama maarmaanka ah sida daqiqda, bariiska, iyo sonkorta waxaa lagu talo galay in laga dhimo 10% lixda bilood ee Jan-June ee sannadka 2022.

- o Isla markaa waxaa lagu talo galay in cashuur dhaaf loo sameeyo calafka xoolaha, ka debeda laga keeno iyo ka wadanka kasoo baxaba.

- o Waxaa Iyana slsh300/kg loo saaray qaadka mashruuca dhimirka, halka imminka loo gooyo slsh200/kg

- o Annaka oo raacayna xeerka dakhliga guud iyo cashuuraha 72/2016 waxaa noo qorshaysan in aanu ilaalino beeraladyna xiliga dalagu u soo go'o; isla markaana aanu dhaqan gelino cashuurta xakayminta.

Mudane gudoomiye, Mudanayaal

Miisaaniyadda sannadka 2022 waa miisaniyad isu dheelitiran, waa miisaaniyad amni, adeeg, wax soo saar, aqoonsi, iyo daryeel, waxaanu idinka codsanayna in aa sidaa ku ansixisaan.

Waa mahadsantihiin, wa bilaahi towfiiq”.

Golaha Wasiiradda JSL Oo Kal-fadhigoodii 84-aad Ku Ansixiyey Ku-talo-galka Odoroska Miisaaniyadda Dawladda Ee Sanadka 2022 Oo 17% Ka Badan Miisaaniyaddii Sanadkii Hore.

Hargeisa 25 December 2021 (WHM)- Golaha Wasiiradda Jamhuuriyadda Somaliland ayaa kal-fadhigoodii 84-aad ee qabsoomay 09/12/2021 oo uu shir-

gudoominayey Madaxweynaha JSL Md. Muuse Biixi Cabdi ku ansixiyey cod aqlabiyad ah Ku-talogalka Odoroska Miisaaniyadda Dawladda Sanadka fooda inagu soo haya ee 2022.



Dhiganaha Odoroska Miisaaniyadda oo ay golaha horgaysay Wasaaradda H. Maaliyaddu, waxa uu guud ahaan cadadkeedu dhanyahay 3,447,802,505,538 (Saddex Tiriliyan, Afar Boqol iyo Toddoba iyo Afartan Bilyan, Siddeed Boqol

yo laba milyan, shan Boqol iyo shan kun iyo shan boqol siddeed iyo soddon shilin). Wuxaanay tii sanadka 2021-ka hore ka badan tahay 17% (Boqolkiiya Toddoba iyo Toban).

Miisaaniyad sannadkeedka 2022-ku waxay u kala korodhay sidan soo socota:

- Miisaaniyadda guud ee Dawladda oo 17% korodhay sannadkan
- Miisaaniyadda Dawladda dhexe waxay korodhay 11% sannadkan
- Miisaaniyadda Dawladaha-hoose waxa ay korodhay 44% sannadkan
- Miisaaniyadda Hay'addaha madaxa-bannaan ee dawladduna waxay korodhay 12% sannadkan
- Mashaariicda deeqaha debbedda ayaa iyaguna miisaaniyaddoodu korodhay 41% sannadkan.

Waxaana xusid mudan in sannadkan Ciidamada Qalabka sida ee kala duwan dhamaantood loo kordhiyey 20% mushahaarooyinkooda.



Ku-talo-galka Odoroska Miisaaniyadda Dawladda ee sanadka soo socda ayaa noqon doonta mid dhamaystiran, taas oo ay ka muuqdaan dhamaan tafaasiisha Miisaaniyadda Hay'addaha Madaxa-Banaan, Dawladaha-Hoose ee Dalka, iyo waliba Deeqaha-Debedda inaga soo gala. Diyaarinta

Miisaaniyadd dhamaystiran ayaa ah talaabo hore loogu qaaday dhinaca isla-xisaabtanka iyo daah-furnaanta waxaana wajigeedii hore la dhaqangaliyey sanadkan gabogabada ah ee 2021, waana sida uu jidaynayo Xeerka Maamulka Maaliyadda Dawladda Xeer Lr. 75/2016.

Sidoo kale oddoroska miisaaniyad-sannadeedka 2022-ka ayaa muhiimadda koowaad lagu saari doonaa qodobadan hoose:

1. Isku dheelli-tirka dakhliga iyo kharashka,
2. Xakamaynta sicir-bararka
3. Ilaalinta qiimaha shilinka Somaliland.
4. Ka guurista ku-tiirsanaanta cashuuraha kastamada.
5. Xoojinta amniga.
6. Qabashada iyo soo saarista biyaha.
7. Ku-talogalka abaaraha.
8. Xoojinta keydka qaranka.
9. Kor u qaadista adeeggyada caafimaadka iyo waxbarashada.
10. Dhiirrigelinta wax soo saarka.
11. Deegaanka.
12. Xoojinta ictiraaf raadinta.
13. Kaabayaasha.



Dhinaca kale Wasiirka horumarinta maaliyadda Dr Sacad Cali Shire ayaa kal-fadhiga 84-aad ee golaha wasiiradda Somaliland ayaa wawa uu halkaasi ka jeediye warbixin uu si qoto-dheer ugaga warbixiyey oddoroska miisaaniyadda iyo sida ay ka wasaarad ahaan xilka iskaga saareen inay dalka u sameeyaan miisaaniyad daboosha baahiyaha kala duwan ee qaranka, isaga oo caddeeyey inay si masuuliyadi ku jirto uga baaraan degeen oddoroska ay sameeyeen, iyada oo ay xubnaha golaha wasiirraduna ku ammaaneen dedaalkii wasaaradda horumarinta maaliyada iyo hawl-wadeennadeedu ay wakhtiga u geliyeen ka

midho dhalinta miisaaniyad sannadkeedka 2022-ka.

Ugu danbayn dood iyo falanqayn dheer kaddib, waxa uu madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland, Mudane Muuse Biixi Cabdi, cod geliyey ansixinta oddoroska miisaaniyadda, waxana ay goluhu cod aqlabiyyad ah ku ansixiyeen miisaaniyadda qaranka ee sannadka 2022-ka, iyadoo ay golaha fadhiyeen 30 wasiir, waxaana u codeeyey 29 wasiir, halka uu wasiir ka maamusay, mana jirin cid diidday ansixinta miisaaniyad sannadeedka 2022-ka.

Kulanka Wadatashiga Degmooyinka Uu Ka Socdo Mashruuca Wadaaga Ah Ee Maamuul Daadejinta Adeegyada Bulshada Ee JPLG Iyo Wasaaraddaha Qaybta Ka Ah Mashruuca

Berbera 25 December 2021 (WHM)- Agaasimaha Guud ee Wasaaradda H. Maaliyadda JSL Md. Maxamed Cabdi Gurxan ayaa 07/12/2021-ka furay kulan wadatashi oo ay qabanqaabadiisa lahaayeen Wasaaradda Maaliyadda iyo Hay'adda UNCDF kaas oo socday mudo 3 cisho, waxaana qayb ka ah maayirada 10 Degmo oo dalka ah, xubno ka socday Hay'addaha UN-ka ee mashruuca JPLG gacanta ka gaysta, Wasaaraddaha Qarshaynta, Arimaha Gudaha,

Hawlah Guud iyo Daneeyayaal kale. Kulah-Hawleedkan oo ah sanadle isla markaana mudnaantiisa leh waxa ay ujeedadiisu daarantahay in qiimayn iyo dib-u-eegis lagu sameeyo waxa ka fulay istiraatijadda maamuldaadajinta lacagta mashaaruuca wadaaga ah ee JPLG gaar ahaana dhinacyada waxbarshada, caafimaadka, horumarinta degmooyinka iyo kabka Dawladdaha-hoose.



Waxa sidoo kale inta uu socdo kulankani lagu gorfayn doonaa hadii Rabi ogolaado, waxyaabaha ka qabsoomay qorshe-hawleedkii sanadkan gabogabada ah kaas oo uu udub-dhaxaad u ahaa barnaamijka dib-u-habaynta maamulka maaliyadda sida; adeegsiga hanaanka is-wada ee maaraynta maamulka maaliyadda (IFMIS),

horumarka laga sameeyey hanaanka diyaarinta miisaaniyadda, bixinta kharashaadka, sida loogu sameeyo dabo-galka, diyaarinta war-bixinaha maamul-maaliyaddeed iyo guud ahaan in lagu socdo qorshaha istaraatijiyyadda Maamul Daadejinta Adeeg-bixinta Dawladdaha-hoose iyo Qorshaha Horumarinta Qaranka ee NDPII.



Ugu danbayn, waxa ay gabagabada kulanhawleedkan xubnaha qaybta ka ah barnaamijkan wadaaga ah ee maamul daadejinta adeeg-bixinta Dawladdaha-hoose si wada jir ah u dejin doonaan qorshaha cusub ee lagu hawl-gali doono sanadkan soo socda hadii Rabi ogolaado. Iyaga oo ka

duulaya casharadii ay ka barteen hawl-galadii hore iyo waliba fursaddaha jira, iyada oo maanka lagu hayo tiirkanka kala duwan ee ay ka koobanyihiin mashruuca JPLG iyo nidaamka dib-u-habaynta maamulka maaliyadda Dawladda ee PFM.

Wasaaradda H. Maaliyadda JSL Oo 150 Cashuur-Bixiye U Qabatay Kulan Aqoon-Is-waydaarsi ah Oo Lagu Lafo-gurayey Nidaamka Online-Ka Ah Ee Cashuur-bixinta Iyo Meel Marinta Awoodaha Sharci Ee Ururinta Cashuuraha.



Hargeisa 25 December 2021 (W.H.M) - Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL ayaa 22/11/ 2021 magaaladda Hargeisa ugu qabatay 150 cashuur-bixiye kulan sanadle ah oo aqoon-is-waydaarsi ah, kuwaas oo lagu tabobarayey nidaamka online-ka ah ee cashuur-bixinta iyo meel marinta awooddaha sharci ee ururinta cashuuraha.

Kulan-hawleedkan oo is kugu jiray aqoon-is-waydaarsi iyo talo-wadaag ayaa ka qabsoomay hotelka Casood ee magaaladda Hargeisa, kaas oo si wayn loogu lafo-guray faa'idooyinka nidaamkan casriga ahi u leeyahay cashuur-bixiyayaasha.



Sidoo kale Cashuur-bixiyayaasha kulankaas kasoo qaybgalay ayaa lagu tabobaray Hanaanka casriga ah ee xisaab-celinta iyo cashuur-bixinta ee adeegsiga khadka tooska ah (Online Taxpayer Portal System), Meel-marinta awoodaha sharci ee ururinta cashuuraha iyo cashuurta iibka ee GST-ga, gaar ahaan hirgalinta mishiinada cashuurta iibka.



Nidaamkan casriga ah ee cashuur-bixinta ee lagu tabobarayey maanta cashuur-bixiyayaasha ayaa ah hanaan u fududayn doona cashuur-bixiyayaasha bixinta cashuuraha iyo xisaab-celintaba, kaas oo sidoo kale u ilaalin doona wakhtigii kaga lumi jiray cashuur-bixinta iyo xisaab-celintaba isla markaana iyagoo xafisiyadooda fadhiya ay bixin doonaan cashuurta sharcigu ku waajibiyey.



Dhinaca kale kulanka ayaa waxa si rasmi ah u furtay Wasiir-Xigeenka Wasaaradda H. Maaliyadda Amb. Rooda Jaamac Cilmi isla markaana ah Kusimaha Wasiirka Wasaaradda, waxa kale oo iyaguna halkaasi ka hadlay Agaasimaha guud ee Wasaaradda Maaliyadda Md. Maxamed Cabdi Gurxan, Guddoomiyaha Rugta Ganacsiga Md. Jamaal Caydiid Ibraahin, Agaasimaha Waaxda Cashuuraha-Berriga Maxamed Ibraahin Batuun,

Agaasimaha waaxda kastamada Maxamed Nuur iyo agaasimaha waaxda shuruucda Maxamed Ismaaciil, kuwaas oo dhamaantood ku dheeraaday mihiimada nidaamka casriga ah ee cashuur-bixinta oo tilmaameen inuu culays badan ka furan doono cashuur-bixiyaasha.



Kulan-Hawleed Aqoon Iswaydaarsi ah Oo Lagu Gorfaynayo Go'aanadda Cashuura, Meel-Marinta Awooddaha Sharci Ee Waaxaha Dakhliga Iyo Sidii Ay Kaalintooda Uga Qaadan Lahaayeen Hay'addaha Kale Ee Dawladdu.

Hargeisa 25 December 2021 (WHM)- Agaasimaha Guud ee Wasaaradda H. Maaliyadda Md. Maxamed Cabdi Gurxan ayaa 07/12/2021 furay kulan-hawleed uu soo diyaariyey Xafiiska Guiddida Dacwadaha Cashuura Somaliland.

Kulan-hawleedka oo socon doona mudo sedex cisho ah waxa lagu gorfayn doonaa go,aanadda cashuura iyo meel-marinta awooddaha sharci ee waaxaha dakhliga, iyo sidii ay uga qayb-qaadan lahaayeen hay'addaha kale ee Dawladdu,

waxaana uu u dhxeeyaa waaxaha Dakhli ururinta iyo hay'adaha ay wada shaqaynta dhaw leeyihiin.



Kulankan aqoon iswaydaarsiga ah ayaa mudadaa sadexda cisho ah lagu gorfayn doonaa sidii Waaxaha Dakhliga iyo Ha'yadaha kale ee Dawladdu ay isu kaashan lahaayeen, isla markaana ururinta cashuurta Dawladda markasta loogu raaci lahaa sida xeerarka cashuuruhu dhigayaan, loogana gudbi lahaa nidaamyadda ku salaysan xeer-jajabaka iyo tanaasulaadka aan shuruucda waafaqsanayn.

Ugu danbayn, Guddida Dacwaddaha Cashuuraha Qaranku waxay Ku aasaasantahay Xeerka Dakhliga Guud ee Cashuuraha Somaliland – Qaybtisa 6aad, Qodobadiisa 109aad, ilaa 249aad ee Xeer Lr.72.2016 Oo Lala Akhriyo Xeerka Kastamada Qdobka 205aad ee Xeer Lr.73.2016. Guddida Dacwaddaha Cashuuraha waa Guddi madax-banaan oo u idman in ay dhagaysato ama dib-u-eegis ku samayso qaraarna ka soo saarto go'aanada cashuureed ee Waaxaha Dakhligu ay ku soo saaraan cashuur-bixiye, iyada oo aanu cashuur-bixiyuhu ku qancin go'aankaas cashuureed isaga oo uga soo rafcaan-qaadanaya Guddida Dacwaddaha Cashuuraha Qaranka.

Wasiir-Xigeenka Wasaaradda H.Maaliyadda JSL Oo Xafiiskeeda Ku Qaabishay safiirka u qaabilsan Wadanka Sweden arimaha Somaliland iyo Somalia

Hargeisa 25 December 2021 (WHM)- Wasiir-Xigeenka Wasaaradda H.Maaliyadda JSL Amb. Rooda Jaamac Cilmi ayaa 01/12/2021 xafiiskeeda ku qaabishay

Ambassador, Per Lindegärd safiirka u qaabilsan Wadanka Sweden arimaha Somaliland iyo Somalia.



Safirka oo dhawaan loo soo magacaabay Xafiiskan ayaa booqasho ku jooga Somaliland waxaana intii kulanku socday labada masuul is kula soo qaadeen arimo ay ka mid yihiin xoojinta xidhiidhka laba geesoodka ah ee ka dhexeeya Somaliland iyo Sweden, iyaga oo si gaar ah isudul-taagay arimo la xidhiidha sidii ay Dawladda Swedish-ku gacan uga gaysan lahayd mashaariic

lagu kobcinayo dhaqaalaha curdinka ah ee bulshada reer Somaliland iyo sidoo kale in ay ka Wasaaradd Maaliyad ahaan wax ugala qaban lahayd barnaamijyo lagu badhitaaro kor u qaadista dakhliga Gudaha/Berriga, barnaamijyada dib-u-habaynta maamulka maaliyadda iyo arimo kale oo la hal-maala.

Kulan-Hawleed Laba Cisho Ah Oo Ku Saabsan Barnaamijka Dib-U-Habaynta Maamulka Maaliyadda Dawladda Ayaa Loo Qabtay Isu-Duwayaasha Hay'addaha Dawladda Ee Gobolka Awdal.



Boorama 25 December 2021 (WHM)- Wasaaradda H. Maaliyadda gaar ahaan Xafiiskeeda Xidhiidhka Barnaamijka Dib-u-habaynta Maamulka Maaliyadda Dawladda ee (PFM) oo kaashanaya Xafiiska Hanti-dhawraha Guud, Xafiiska Xisaabiyahga Guud, Waaxda Miisaaniyadda iyo Waaxda Maamulka Nidaamka Xogta Maaliyadda Dawladda ee (SLFMIS) ayaa kulamo isugjira tabobarso iyo wacyigelintu ku saabsan Maamulka Maaliyadda Dawladda u qabtay isuduwayaasha, xisaabiyeyaa iyo hawl Wadeenda Wasaaraddaha iyo Hay'addaha Madaxa-bannaan ee Gobolka Awdal.

Tabobarkan iyo wacyigelinta oo socondoonaa muddo saddex maalmood ah waxa si rasmi ah u furay Guddoomiyaha Gobolka Awdal Md. Maxamed Axmed Caalin Tiimbaro.

Waxaan inta uu socdo lagu lafo-guridoonaa habraacyada iyo hannaanka Dib-u-habaynta Maamulka Maaliyadda Dawladda ee casriga ah; sida, habraaca diyaarinta iyo fulinta miisaaniyadda, habraaca war-bixinaha iyo xisaab-xidhka, isticmaalka Nidaamka Maamulka Xogta Maaliyada (SLFMIS) iyo habraaca u diyaar garowga baadhisaha hanti-dhawrka IWM.



NAADINTA: WAJIGA KOWAAD EE XARAASHKA BADDEECADDHAH KU MUDO-DHAAFAY KASTAMKA DEKEDDA BERBERA

Waaxda Kastamada oo kaashanaysa Shirkadda Dp.World iyo sharaa'iga Rarka Maraakiibta ka shaqeeya waxa ay bilaabaysaa xaraashka badeecaddaha yaalay Kastamka Dekedda Berbera wax ka badan lix billood. Xeerka Kastamada Somaliland Xeer Lr. 73/20216 waxa uu awood u siinayaas Kastamadu inay meesha ka saaraan badeecaddaha mudo-dhaafka ah haday tahay inay xaraashaan wixii iib-gal ah, burburiyaan, ama sifo kalaba inay meesha uga saaraan.

Waxa la yagleelay Guiddida Xaraashka oo ah mid is-ku-dhaf ah si loo meel-mariyo hawsha xaraashka badeecaddaha mudo-dhaafka ah,

waxaana wajigan kowaad loo mari doonaa labadan dariiqo ee soo socda:

Baddeecaddaha La Xaraashayo.

Waxa wajigan koowaad lagu bilaabi doonaa xaraashka laba Container oo ka mid ah tiro badan oo ay ku jiraan baddeecaddaha mudo-dhaafka ahi, waxa aanay kala noqonayaan faah-faahimahoodu sidan hoose:

Baddeecaddaha La Xaraashayo.

Waxa wajigan koowaad lagu bilaabi doonaa xaraashka laba Container oo ka mid ah tiro badan oo ay ku jiraan baddeecaddaha mudo-dhaafka ahi, waxa aanay kala noqonayaan faah-faahimahoodu sidan hoose:

ContainerNumber:MSKU7028176

- 197 daaqadood oo shiid ah, midkastana cabirkisu yahay 900 oo waar.

ContainerNumber:MAEU4122051

- Taanggiga casriga ah ee lagu kaydiyo raashinka wadaniga ah sida; hadhuudhka, galayda, qamadida iwm.

Badeecaddaha Sikalelooga faaii daysanayo.

Wasaaradda H. Maaliyaddu waxa ay kaalmo ahaan ku siinaysaa Cisbitaalada waaweyn ee Dalka laba container oo ay ku jiraan agab caafimaad oo ay ka mid yihin: Sariiraha bukaanka, agabka shaybaadhka, iyo kuwo kale oo badan.

Tafaasiisha iyo faah-faahimaha afartaa container ee aynu soo sheegnay waxa aad mar kale ka dheehan kartaa shaxdan hoose:

Goorta uu yimid Dekedda	Tirsiga (No) Container-ka	Wakiilka Markabka	Biilkha Rarka	Cida soo dejisay	Baddeecadda
03/02/2019	MAEU4122051	MSK	564051453	Afro Arabia Gulf Gen. Contracting	Agabka lagu kaydiyo raashinka wadaniga ah
05/04/2019	MSKU7028176	MSK	581233000	Yassen Mohamoud Osman	197 daaqadood oo shiida, midkiiba yahay ۹۰۰ oo waar.
18/01/2019	MRKU4213733	MSK	967159570	Dalaal Hospital Qabridahar Zone	Agab Caafimaad
14/9/2019	MRKU5108985	MSK	954239304	Mohamed Hussein Sandhere	Agab Caafimaad

F.G. Wasaaradda H. Maaliyaddu ugama gollaha hawshan inay faaiido-lacageed ka samayso, balse ujeedadu waxa ay tahay fududaynta habسامي u socodka baddeecaddaha ka soo degaya Dekedda. Waxa ay sidoo kale ka mid tahay isbedelada lagu sameeyey Dekedda Caalamiga ah ee Berbera.

Waxaana loo maarayn doonaa lacagta ka soo xaroota baddeecaddaha iib-galka ah ee la xaraashayo sidan soo socota:

- Waaxda Kastamadu waxa ay ka goosan doontaa cashuurtii ku baaqatay Badeecaddahan mudo-dhaafka ah ee la xaraashayo iyo sidoo kale kharashaadka loo galay si loo meel-mariyo hawsha xaraashka.
- Wixii ka soo hadha waxa la siin doonaa shirkaddaha Cargo-ga iyo maamulka dekeda si loogu dabaro kharashaadkii kala duwaan ee lagu yeeshay baddeecaddani mudadii ay taalay Dekedda.

Hadaba, waxa lagu war-galinayaayaa cidii lahayd 4taa container ee faah-faahimahooda sare lagu soo sheegay, iyo cid kaṣṭa oo ay Kastamka Dekedda Berbera ka taalo baddeecad mudo-dhaaf ahi inay mudo 30 cisho gudahood ah oo ka bilaabanta 7-da December/2021 kula baxaan alaabtooda, iyaga oo la soo xidhiidhaya maamulka kastamka is la markaana sita dhukumentiga cadaynta lahaanshaha baddeecadda.

Waxa mar labaad lagu adkaynayaayaa qof kasta oo leh baddeecad taala Kastamka Dekedda Berbera wax ka badan lix bilood inuu sida ugu dhakhsaha badan alaabtiisa uula baxo.

Waaxda Xidhiidhka-Dadweynaha & Xogta

Wasaaradda H. Maaliyadda JSL Oo Abaal-Marino Gudoonsiisay

31 Cashuur-Bixiye Ee Ugu Wanaagsanaa 2021-ka

Hargeisa 25 December 2021 (WHM) - Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JS Layaa xalay abaal-marino gudoonsiisay 31-kii cashuur-bixiye ugu wanaagsanaa 2020-ka. munaasibada abaal-marinta oo ka qabsoontay hotel Dhoola-yare ee magaalada hargeisa, ayaa lagu abaal-mariyey 31 cashuur-bixiye oo ka kala yimid guud ahaan gobolada iyo degmooyinka dalka, iyadoo laga soo kala xulay ganacsatada heerar kooda kala duwan, isla markaana xulistooda loo raacay xeerarka iyo habraacyada u yaala xeerarka cashuuraha dawlada JSL. Munaasibaa Abaal-Marinta Cashuur-Bixiyaha wanaagsan oo

sanadkii hore 2021-kii la bilaabay ayaa noqon doonta mid si joogta ah loo qabto sanadkiiba hal mar, sida uu dhigayo qorshaha sanadlaha ah ee Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL. Sidoo kale talaabandan oo ah mid hore loogu qaaday xaga dhiirigalinta cashuur-bixiyayaasha, oo ah kuwo kaalin muhiima ugu jira guud ahaan qaranka ayaa abaal-marin u noqonaysa guuleystaayasha maanta, sidoo kalena dhiiri-galin u noqonaysa guuleystaasha bari.

Wa Bilaahi Tawfiq=

Waaxda X/Dadweynaha iyo Xogta W.H.Maaliyadda JSL
www.slmof.org ,
Som.slmof.org
Info@slmof.org 513856.



Barnaamijka Dib-u-habaynta Maamulka Maaliyadda Dawladda (PFM)

Tiirka 2aad: Kocinta Dakhliga Gudaha

Ujeeddo: Kor u Qaadista Dakhliga iyo Ballaadhinta Cashuuraha oo la gaadhsiyo heer sare iyada oo la aasaasayo Hay'adda Dakhliga Somaliland. (Somaliland Revenue Authority)

Tiirka 2aad waxa uu dardargelinaya Kor u qaadista dakhliga iyo balladhinta cashuuraha, taas oo ay udub-dhexaad u tahay diyaarinta, meelnarinta iyo fulinta xeerka dakhliga iyo xeerka Kastamada oo dhammaantoodba dhaqangal ah lana hirgeliyey. Tiirka 2aad ee maamulka maaliyadda dowladdu wuxu hagaa kor u qaadista Dakhli-ururinta, hagaajinta abaabulka dakhliga gudaha iyo dardargelinta dib u habaynta qaab-dhismeedka waaxaha dakhliga ee Cashuuraha Berriga iyo kastamada oo lamideynoono muostaqbalka dhow, iskudarkoodana ay ka yagleelmi-doonto hay'ad guud oo ka shaqaysa maamulka dakhliga dowladda.

Tiirka 3aad: Tayeynta iyo Casriyeynta Warbixinaha iyo Habraaaca Xisaabaadka Dawladda

Ujeeddo: Hagaajinta iyo kor u qaadista warbixin xisaabeedka Wasaaradaha, Waaxaha, Wakaaladaha iyo Dawladaha Hoose ee Dalka, si loo gaadho daahfurnaan iyo isla-xisaabtan ku saabsan isticmaalka hantida dawladda.

Tiirka 3aad ee Maamulka Maaliyadda Dawladda waxa looga danleeyahay tayeynta iyo hagaajinta Maamulka iyo War-bixinaha Maaliyadeed, ilaalinta mabaa'dii'da isla-xisaabtanka iyo daahfurnaanta isticmaalka maaliyadda dawladda. Tiirka 3aad ee Barnaamijka Dib-u-habaynta Maamulka Maaliyadda Dawladdu waxa uu awoodd dhisid iyo taageero farsamo siyyaa xafiska Xisaabiyaha Guud iyo Waaxda Maamulka Xogta Maaliyadda Dawladda (FMIS). Barnaamijka Maamulka Xogta Maaliyadda Dawladdu waa hab casri ah oo loo adeegsado aaladdaha ku shaqeeya Internetka

sida Kompuuyutarada, telefoonada gacanta ee casriga ah iy aaladaha kale ee loo adeegsado Teknoolajiga, kaasi oo dawladda u sahlaya in ay xogaha xisaabaadka ee dakhliga iyo kharashkaba u xisaabiso hab warqadla'aan ah.

Tiirka 4aad: Tayeynta iyo Casriyeynta maamulka Hannaanka iibka iyo Qandaraas bixinta Dawladda

Ujeeddo: Kor u Qaadista iyo Dhiirigelinta Tartanka Qandaraasyada, Hubinta Qiimagalka Lacageed iyo Daahfurnaan Qandaraasyada Dawladda

Tiirka 4aad ee maamulka maaliyaddu waxa uu diiradda saaraa kor u qaadista iibsiga alaabaha iyo adeegyada ee dowladda, taas oo ay kamidtahay dardargelinta tartanka qadaraasyada, iswaafajinta qiimaha lacageed iyo adeegga amma alaabta, xakamaynta iyo daahfurnaanta iibka si ay dowladdu ugu suurtogasho in ay iibstato adeegyo iyo alaab tayo leh, kuna iibsato qiimo macquul ah, ka iibsato cidda ku habboon iyo goorta habboon Tiirka 4aad ee maamulka maaliyaddu waxa uu awood dhisid iyo taageero farasamo siyyaa Guiddida Qadaraasyada Qaranka.

Barnaamijka Dib-u-habaynta Maamulka Maaliyadda Dawladdu waxa uu hiigsanayaa hirgelinta ilsa-xisaabtan, daah-furnaanta iyo hufnaanta maamulka iyo qoondaynta maaliyadda dawladda, si loo gaadho bartilmaameedka Qorshaha Horumarinta Qaranka iyo hiraalka 2030

Buuga Xogsidaha Cashuuraha

CUTUBKA 9AAD CASHUURTA LA REEBO EE MA-DEGGANAYAASHA (WITHHOLDING OF NON-RESIDENTS)

1. Waa maxay cashuurga Ma-degganayashu (withholding of non-residents?)

Waacashuur kuwaajibtay: dadka aandalka degenaynee dakhli ka hela gudaha dalka.

2. Yey ku waajibtey cashuurga Ma-degganayasha 3. (Withholding of non-residents)?

Dadka aan dalka degenayn ee dakhli cashuuri ku waajibtay ka soo galo gudaha dalka.

4. Imisaa la bixiyaa cashuurga Ma-degganayasha?

Cashuurga withholding of non-residents waxaa la bixiyaa 10%

5. Sidee loo bixiyaa cashuurga Ma-degganayasha?

Cashuurga ma-daganayaasha waa la bixiyaa: waxaa ka reebaya wakiil cashuureed oo bixinaya lacagta cashuurga ma-daganayaasha kuwaajibtay waxa la mid yahay loo shaqeeysaha reeba cashuurga shaqaalihiisa oo kale, ka dibna cashuur-reebaha ayaa bixinaya bil walba cashuurtii uu reebay.

6. Goormaa la bixiyaa cashuurga withholding of non-residents?

Cashuurtama-daganayaasha waa la bixiyaa: bishii hal mar ama xilli kasta oo ay waajibto.

7. Xaggee lagu bixiyaa cashuurga Ma-degganayasha?

Cashuurga ma-daganayaasha waa la bixiyaa: waxaa lagu bixinaya xafiisyada cashuuraha berriga ee ku shaqada leh.



16 XOGSIDAHA CASHUUR BIXIYAH

8. Haddii aan la habsaamo maxaa dhacaya cashuurta Ma-degganayasha? Cashuurta ma-daganayaasha ~~haddi~~aad la habsaanto waxaa dhacaya: Ganaax.
9. Maxay yihii ganaaxyada cashuurta Ma-deganayaashu (withholding of non-residents)?

Ganaaxa Cashuurta ma-daganayaasha ~~waxuu~~ noqonyaa: 2% ku dhacaya cashuurta waajibtay.

La soco.....

Muwadiin Wax ka Barro Noocyada Tacriifadaha

Faahfaahin	Wakhtiga	Qiimaha Halka(Unit)	Cid Loo Xayeysi-nayo Iyo Halka Laga Siidaynayo	Mudada Ugu Yare
Barnaamij	Hal Mnt	\$15 Per/Unit	Local Tv And Satelite Tv Bar-naamijka Wacy-igalinta Shirarka Sharaa'id Semenairs Iwm	10 mnt
Qiimaha Bar-naamijyada Hayadaha Caalamiga Ah Ee Satelite Ka Iyo Local Iskugu Jira				
Faahfaahin	Wakhtiga	Qiimaha Halka(Unit)	Cid Loo Xayeysi-nayo Iyo Halka Laga Siidaynayo	Mudada Ugu Yare
Barnaamij	Hal Mnt	\$40 Per/Unit	Local Tv And Satelite Tv Bar-naamijka Wacy-igalinta Shirarka Jara'iid Semenairs Iwm	10mnt
Faahfaahin	Wakhtiga	Qiimaha Halka(Unit)	Cid Loo Xayeysi-nayo Iyo Halka Laga Siidaynayo	
Warka	Halkii War	\$150 Habeenki	Local Ngo Seminairs Shirarka Jara'iid Iwm	
Warka	Halkii War	\$250 Habeenkii	Un And Ngo (Hayadaha Calaamiga Ah) Semenairs	
Xayeysiiska Liid-ka Yer Ee Xaga Hoose Ee Tv Ga Mara Oo Satelite \$10 Xayeysiiska Liid-ka Yer Ee Xaga Hoose Ee Tv Ga Mara Oo Local Ah \$5				
Hal Bil	\$8			

Saddex Bil Lix Bilood	\$15			
Lix Bilood San-ad	\$20			

1.3.11.2 AJUURADDA LIISAMADDA MADBACADDHA, WERGAYSYADDA & SUXIFIYIINTA

Media Production	Local sole	Local partnership	Sole foreign	Joint venture foreign
TVs	500\$	800\$	800\$	1500\$
Journals	250	400	600	1000
Radio	Nil	Nil	Nil	Nil
Websites	150	200	300	500

1.3.12 WASAARADDA DEEGAANKA IYO HORUMARINTA REER MIYIGA

1.3.12.1 AJUURADDA RUQSADDA KHAYRAADKA

Nooca Cashuurta /Fee	Tacriifada
Ruqsada Cawska (Grass Permit)	100,000/=
Cashuurta Cawska B/Buurta 3_6 Ton	70,000
Cashuurta Cawska B/Buurta 7_19Ton	120,000
Cashuurta Cawska B/Buurta 20 Ton	160,000
Cashuurta Cawska Dameerka/Fardaha	20,000
Cashuurta Cawska Awrka	25,000
Cashuurta Nuurada/Xaabada Baabuurga 6 Ton Ah	30,000
Ruqsadaha Barkadaha	150,000
Cashuurta Barakaha Sanadkii	150,000
Liisanka Ganacsiga Xabada Sanadkii	300,000
Liisanka Ganacsiga Nuurada Sanadkii	50,000/=
Maydiga 100kg	35,000/=
Maxoorka Fooxa 100kg	15,000/=

1.3.13 LAANTTA SOCDAALKA

1.3.13.1 AJUURADDA FIISAYAASHA

	Month	3 Month	6month	1 Year	
Ajnabi	\$77	\$138	\$248	\$306	
Muwaadin	0	0	0	\$72	

La soco.....

Cashuurta iyo Cashuur-Bixiyaha

1. Cashuur-Bixiye maxaad u bixisaa cashuurta kugu waajibtay? Maxay se tahay faaiidada ku jirtaa?

Somaliland waxay rabtaa inay gaadho is ku filnaansho

- a) Kuma tiirsanaan karo deeqo aynu ka helo debeeda, xataa hadii aynu lacag soo daynsano waxa loo baahanyahay lacag dib loogu bixiyo.
- b) Ogow cashuur-bixiye cashuur yar oo soo xaroota (dakhli) macnaheedu waa adeeg yar oo ay fuliso Dawladdu.
- c) Cashuur bixintu waa jidka ugu haboon ee muwaadinku kaga qayb qaadan karo gacansiinta Wadankiisa.
- d) Cashuurta ganacsigu waxay korodhay intii u dhaxaysay 2018/2020 51% (Boqolkiiba Kow iyo Konton).
- e) Umadaha ilbaxa ah ee hormuudka ka ah horumarka Qarankoodu, kama war-wareegaan bixinta cashuuraha ku waajibay.

2. Hadaba halkay ku baxdaa cashuurta uu bixiyo cashuur-bixiyuhu?

- a) Cashuurta waxa lagu qabtaa adeegyada muwaadinku uga baahanyahay Dowladdiisa, sida wadooyinka, nabadgalyada, biyaha iwm.
- b) Miisaaniyadda sanadlaha ah ee Dowladdu waxa ay ku salaysan tahay hadba inta ay le'egtayahay cashuurta la rajaynayo inay soo xarooto sanadka soo socda.

3. Waa maxay mudnaanaha kharash ee Dowladdu?

Meelaha ay mudnaanta gaarka ah siiso badanaa miisaaniyadda Dowladdu waxa ka mid ah: nabadgalyada, caafimaadka, waxbarashada, biyaha, cadaalada, shaqo-abuurka dhalinyarada, dhiirigalinta maalgashiga, xoolaha, beeraha iyo kaluumaysiga.

4. Xeerarka cashuuraha wax ay kala yihiin:

- a) Xeerka dakhligaguud iyo cashuuraha bariga xeer lanber 72/2016 iyo xeer-nidaamiyeashaasiisa ka farcamay ee kala ah 01/2017 iyo 02/2019.
- b) Xeerka kastamka xeer lanmber 73/2016
- c) Xeerarka kale ee dhaqan galka ah ee ku xusan shaxda 7-baad ee xeerka dhakhliga xeer lanmber 72/2016.
- d) Wixii faah-faahin dheeraad ah ee ku saabsan cashuuraha waxa aad ka daalacan kartaa shabakada Wasaaradda Maaliyadda ee www.slmof.org ama www.som.slmof.org.

5. Is-barbar-dhiga tacriifadaha (Rates) cashuuraha Jamhuuriyadda Somaliland iyo kuwa wadamada jarka.

Waxa aanu is barbar-dhig ku samaynay xadiga cashuuraha J.Somaliland iyo kuwa ay qaadaan Wadamada Bariga Africa Waxa aad ka dheehan kartaa shaxdan ama table-kan hoos ku xusan.

Dalka	Cashuurta MM. Ganacsiga	Cashuurta MM. Shaqaalaha	Cashuurta libka Adeega iyo Alaabooyinka
Somaliland	12.3%	6%	5%
Kenya	30%	30%	16%
Ethiopia	35%	35%	15%
Tanzania	30%	30%	18%
Uganda	30%	40%	18%
Rwanda	30%	30%	18%
Burundi	35%	35%	18%
Djibouti	25%	25%	10%

Shaxdan waxa aanu ka soo xiganay: Hay'ada PROFR

Waxa aad halkaa ka arki kartaa in xadiga cashuuraha Wadamada Bariga Africa dhamaan ka sareeyaan kan lagu qaado Somaliland.

6. Noocyada cashuuraha Tooska Ah Ee Somaliland

Hadaba hadaynu noocyada cashuuraha mid-mid isu dul taagno si ay aqoon ugu yeeshaan cashuurta ku waajibtay cashuur bixiyayaashu iyo wajibaatka dheeraadka ah ee uu ina farayo xeerarku, waa sidan:

1. Cashuurta MM. Shaqaalaha: waa cashuurta ku waajibtay dakhliga shaqaaluhu ku helaan shaqo ay qabteen, waxa xeerku waajibinaya inuu ka reebo loo shaqeeyuhu is la markaasna uu ku soo bixiyo xafiiska ugu dhaw ee cashuuraha-berriga ugu danbbayn 15-ka cisho ee bisha xigta bisha ay cashuurta wajibtay. Xadiga cashuurta macaashal-macaashka shaqaaluhu waa 5% kaliya, oo lagu daray 1% oo ah cashuurta moorka ah (Stamp duty).
2. Cashuurta Iibka ee Adeegyada iyo Allaabooyinka (GST): cashuurtani waxay ku dhacdaa badeecadaha la soo dejiyey, iyo kuwa gudaha Dalka lagu farsameeyey iyo qaar kamida adeegyada lagubixiyo gudaha wadanka sida adeega isgaadhsinta,korontada,biyaha,tigidhada gadiidka hoteelada iyo adeegyada kale ee ay cashuurta ku waajibtay; waxa ka masuula warshadlahama cidii adeega bixinaysa oo ku daraya 5% qaansheegta qiimaha badeecada iyo adeega. Cashuurta iibka ee ku waajibtay adeega iyo alaaboooyinku waa 5% kaliya.
3. Cashuurta Madeganayaasha: waa cashuurta dakhliga aan joogtada ahayn, cashuurta la reebayaa (withholding tax) waa cashuurta ku waajibtay dadka aan Dalka deganayn balse dakhli kasoo galay hawl ay u qabteen cid kale oo Dalka degan, sida hawl la taliyenimo faaiidada kasoo gashay saami shirkadeed, dakhli kiro ama dakhliyo kale, waxa xeerku waajibinaya inuu ka jaro oo soo bixiyo wakiilkiisu ama cida uu uqabanayo hawshaas ee bixinaysa lacagta shaqadaas, xadiga cashuurtani waa 10%.
4. Cashuurta Dakhliga Daaraha: Cashuurtani waxa ay ku waajibtay mulkiilaha daarta kiraysan is ka leh, waana mid sanadle ah. Xadiyada cashuuraha dakhliga daarahu waa 10%.
5. Cashuurta Macaashal-Macaashka Ganacsiga: Sida uu qeexayo qodobka 69-aad ee xeerka dakhliga cashuuraha-berriga JSL, Cashuurta macaashka ganacsiga waxa loola jeedaa: “dakhli kasta oo qof ama shirkad ka soo gala hawlgal ganaci”. Waxa lagaaga baahan yahay Xisaab-xidhka Cashuurta macaashka ganacsi-ga oo ah sannadle ugu danbayn bisha afraad ee sannadka cusub. Cashuurta macaashka ganacsi-ga waxaa loo bixinaya: qiimaynta xafiisku sameeyo ee katimi Xisaab-xidhka cashuur bixiyaha ama qiimayn kale oo uu xafiisku ka samayeyay xog aan ahayn Xisaab-celinta. Xadiga cashuurta macaashal-macaashka ganacsigu waa 10%.
6. Wuxa intaa soo raaca xadiyo aad u yaryar oo ah cashuuraha maamulka iyo moorka kuwaas oo raaca cashuuraha ku dhaca dakhliga soo gala jeebka qofka.
7. Xadiyada ama rates-ka cashuuraha Somaliland waa kuwo ka hoose kuwa ay qaadaan Wadamada Africa.

7. Side ayaad hadaba ubixinaysaa cashuuraha kugu waajibay?

- a) Sideedaba hadii aad ganacsi leedahay ka diwaan gali cashuuraha-berriga oo qaado sumada aqoonsiga cashuur-bixiyaha.
- b) Ilaali markasta diwaankaaga xisaab-xidhka
- c) Markasta ilaali xisaab-celinta oo fayl garayso xiligeedi adoo ku soo lifaaqaya dhukumintika khuseeya , taasi waxay kaa saacidaysaa habسامي u socodka ganacsigaaga.
- d) Ku bixi markasta cashuuraha kugu waajibay wakhtigooda.

8. Sidee ayaad cashuur-bixiye si fudud ugu bixin kartaa cashuuraha kugu waajibay?

- Mudane/Marwo: si aanu u fududayno hanaanka cashuur-bixinta waxa aanu idin diyaarinay hanaanka casriga ah ee e-cash, anagoo hada idin daah-furay E-Dahab, waxa aanu sidoo kale rajaynaynaa inaan ku soo biirino adeega Zaadka, adiga oo cashuurta ku bixin doona lacagta mobile-kaaga gacanta ku jirta.
- Waxa aanu sidoo kale idin diyaarinay hanaan casri ah oo is wada (automate) is la markaana online-ah, kaas oo ah daaqad (taxpayer portal) aad ka heli doonto dhamaan adeegyadii aad u iman jirtay xafiiska C/Berriga.
- Hadaba hadii aanad wali is diwaangalin, fadlan booqo oo raac

linkigan: somaliland-ird.com/taxpayer/StartRegistration.aspx

The screenshot shows the homepage of the Somaliland Revenue Department (IRD) Taxpayer Portal. At the top, there is a header with the logo of Save the Children, the text "Welcome SAVE THE CHILDREN", and "Your TIN: 100017431". To the right are links for "Settings", "Notifications", "Help", and "Sign Out". Below the header, there are four main sections: "Registration", "Return", "Taxpayer Education", and "Taxpayer Service".

- Registration:** Contains icons for "Register", "Request Modification", and "De-Register".
- Return:** Contains icons for "Employment Income", "Goods and Services Tax", and "Previous Filings".
- Taxpayer Education:** Contains icons for "Laws and Regulations", "Forms, Tools and Guidelines", and "Training".
- Taxpayer Service:** Contains icons for "Request Tax Clearance", "Tax Calculator", and "Customer Care".

9. Wixii faahfaahin dheeraad ah ee ku saabsan cashuur-bixinta waxa aad ka heli kartaa:

- Mareegta Wasaaradda H. Maaliyadda JSL: slmof.org (English), som.slmof.org (Somali)
- Xeerarka Cashuuraha-Berriga iyo hagayaashooda, waxa aad sidoo kale ka heli kartaa mareegta Wasaaradda, adigoo ka sii tagaya returns@Somaliland_IRD.com
- Xafiiska Daryeelka Macmiilka Waaxda C/Berriga.
- Waxaad garaaci kartaa numberka gaaban ee 3535.
- Ama soo booqo xafiisyada Waaxda ee Degmooyinka iyo Gobolada.
- Waxa aad sidoo kale la xidhiidhi kartaa Xafiiska Xidhiidhka Dadweynaha Wasaaradda:
Email: Info@slmof.org, Landline: 513856, Whatsapp: 65-7729999.



+5%

MISHIINKA CASHUURTA IIBKA

Si Loo Helo Xisaab Cashuureed Oo
Sugar, Fadlan gacan nagu sii
Adeegsiga Mishiinka Cashuurta libka

INFO@SLMOF.ORG

WWW.SLMOF.ORG



ODOROSKA MIISAANIYADDA DAWLADDA-DHEXE 2022

SLSH 2,410 BILYAN

OO KA BADAN 11% MIISANIYADII 2021, TII OO CASHUURAHA
QUUTAL DARUURIGA HOOS LOO DHIGAY 10 %

WAXAA SARE LOO QAADAY QOONDADA



MUSHAHARKA
CIIDAMADA



HORUMARINTA
MASHAARIICDA
IYO ADEEGA BIYABA



HORUMARINTA
ADEEGAYADA
CAAFIMAADKA



DEDAALADA
AQOONSI RAADINTA
IYO ARIMAHADIBADA



WAXSOOSAARKA

20% ↑

94% ↑

32% ↑

20% ↑

12.5% ↑